# UDIYAARGAROWGA BILAABITAANKA DUGSIGA

**Dugsi bilaabidda waxay isbadal weyn u tahay ubadka iyo qoysaska. Laqabsashada dad cusub, goobo cusub iyo hawl-maalmeedyo cusub ayaa noqon kara wax xiiso leh – oona adag. Waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameyn karto si aad ooga caawiso canugaaga inuu si wanaagsan u bilaabo dugsiga.**

## Waa maxay bilaabidda wanaagsan ee dugsiga?

Qoysaska iyo daryeelayaasha ayaa ah macalimiinta ugu horreeyo ee ubadkooda. Waxyaabaha aad guriga kula sameyso ubadkaaga ayaa kacaawiya waxbarashadooda iyo hormarkooda waxayna udiyaariyan dugsiga. Habka ugu wanaagsan ee aad kutaageereyso waxbarashada iyo hormarka ubadkaaga ayaa lagu gaaraa **ciyaarta**.

Bilowga wanaagsan ee dugsiga wuxuu ubadka kacaawiyaa inay si fiican wax ubartaan oo ay dareemaan farxad. Oo marka ay ubadku ku faraxsan yihiin dugsiga, waxay rabaan inay wax sii bartaan. Dugsiga ilmahaaga ayaa kudadaali doona inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga, iyadoo la siinayo taageero dheeraad ah haddii loo baahdo. Waxaad sidoo kale ku caawin kartaa ubadkaaga adigoo u sameynaya waxyaabaha ka caawin kara inay ku xasilaan dugsiga oo ay ku dareemaan badqab, kalsooni, iyo isku xirnaan.

## Ciyaarta iyo wax kubarashada guriga

Ciyaarta waa habka ugu wanaagsan ee aad ku caawin karto in ubadkaagu waxbarto. Ciyaarta waxay kobcisaa xirfadaha nolosha oo dhan ah ee xisaabta, sida tirinta, kala soocidda, koox-kooxeynta iyo cabiridda. Ciyaarta waxay ka caawisaa in canugaagu ogaado waxyaabaha dabiiciga ah iyo sayniska waxayna u oggolaataa inay hal abuur yeeshaan. Marka uu ubadkaagu ciyaarayo, waxay sidoo kale baranayaan wax kusaabsan shucuurta iyo kobcinta luuqadooda iyo xirfadaha wax qorista iyo wax akhrinta. Halkan waxaa kuyaala qaar kamid ah waxyaabaha aad ku sameyn karto guriga.

- **Hawlo maalmeedka:** Carruurta waxay wax kubartaan hawlo maalmeedka sida wax karinta, ka caawinta dhigidda iyo tirtiridda miisaska, kala soocidda dharka la dhaqayo, meel dhigidda dharka iyo alaabo-alaabeyda caruurta kuciyaarto, iyo xanaaneynta dhirta iyo xoolaha la dhaqdo. Waxaad inuu canugaaga waxbarto aad ku caawin kartaa adigoo weydiinaya su'aalaha, sida '*Imisa koob oo bur/daqiiq ah ayaanu ubaahanahay?*' ama 'M*a soo heli kartaa sigsaanta u eg?*'
- **Ciyaaraha:** Ciyaaridda ciyaaraha fudud sida kaararka lagu ciyaaro ee UNO, Turubka, Ciyaaraha Xusuusta, Halxiraalaha, iyo Dhuumacshaalowga waxay ka caawiyaan in canugaagu waxbarto waxayna baraan tooko qaadashada.
- **Alaabo-alaabeyda dhismaha:** Wax kudhisidda alaabo-alaabeyda sida LEGO, alaabo-alaabeyda alwaaxa ah ama sanduuqyada kartoonada ah waxay kobciyaan xirfadaha dhaqdhaqaaqa murqaha yaryar ee jirka waxayna u oggolaadaan in caqnugaagu hal abuur yeesho oo uu xalliyo dhibaatooyinka.
- **Farshaxanka iyo gacan qorka**: Waxqabadyada farshaxanka iyo gacan qorka ayaa sidoo kale hormariyo hal abuurka waxayna dhisaan murqaha yaryar ee jirka iyo xirfadaha xallinta dhibaatooyinka.

- **Labisashada**: Kulabisashada dharka duugga ah iyo iska dhigista noolayaal kale waxay dhistaa hal abuurka iyo xirfadaha luuqada.
- **Muusiga, sheekooyinka iyo qoob kaciyaarka:** Akhriska, sheeko ka sheekeynta, dhageysiga iyo qoob ka ciyaarka muusiga, 'ciyaarta la raadinayo wax maqan' si loo soo helo waxyaabaha kujira guriga hareerihiisa ama beerta ayaa dhammaantood dhisa xirfadaha luuqada ee canugaaga.
- **Ciyaarta bannaanka:** Socodka, meel fuulista, baskiil kaxeynta ama iskuutarka, aaditaanka garoonka kubadda, dhisidda lakabyada iskifaalooyinka, tuurista iyo qabashada kubadda, ku garaacista kubaddaha jilicsan usha teeniska ama usha jilicsan ee kiriketka, qodista wasakhda iyo dhiiqada – dhammaan kuwani waxay ka caawiyaan in canugaagu waxbarto oo uu hormaro.
- **Dabagal oo su'aalo weydii:** Marka uu canugaagu ciyaarayo, weydii su'aalaha sida *'Ma qeexi kadhaa…?'*, *'Waxaan layaabanahay waxa dhici lahaa haddii…?', 'Sidee ayaad ooga jawaabi lahyd su'aashaas...?'*
- **Jadwalada hawlaha:** Sameynta hawlaha waqti isku mid ah ee maalin kasta waxay u oggolaaneysaa in ubadkaagu ogaado waxa la filayo in la sameeyo waxayna kacaawisaa inay maareeyaan dareenkooda. Jadwalada hawlaha waxay carruurta ka caawiyaan inay la qabsadaan dugsiga. Waxaa si gaar muhiim u ah in loo sameeyo jadwalka jiifka, tusaale ahaan: cunto siinta iyo uqubeynta, u xiridda dharka jiifka, ilko cadeysashada, buug akhrinta, kadibna seexashada.

## Kadhig dugsiga goob la yaqaano

'Udiyaarsanaanta dugsiga' kuma saabsana barashada tacliinta, laakiin waxay kusaabsan tahay fahmitaanka waxa uu dugsigu noqon doono iyo lahaanshaha rajooyin wanaagsan. Halkan waxaa kuyaalo qaar kamid ah waxyaabaha aad sameyn karto inaad ku caawiso ubadkaaga:

- Kaqeybgeli ugudbitaan kasta oo barnaamijyada dugsiga ah oo uu bixiyo dugsiga barbaarinta ubadka ama dugsiga ee ubadkaagu dhigto.
- Bar aadititaanka iyo ka imaanshaha dugsiga.
- U oggolow in canugaagu la ciyaaro carruurta kale ee ay isku dugsiga dhigtaan.
- Ku dhiirigeli madaxbanaanida adigoo baraya ubadkaaga sida loo labisto, loo aado suuliga, loo gacmo dhaqdo, loo xidho ookiyaalaha cadceeda, iyo sida buugaagta loogu gurto oo loogu qaato boorsada iskuulka.
- Kala hadal bilaabidda iskuulka. Ku xiisi geli ubadkaaga dugsiga oona kala hadal wixi walaac ah ee ay kaqabaan.
- U akhri buugaagta ama ooga sheekee sheekooyin kusaabsan bilaabidda iskuulka.
- Kala hadal oo ugu celceli waxa dhici doono dugsiga kadib.
- Udiyaargaree soo qaaditaanka iyo keenista adigoo hubinayo waqtiyada uu dugsigu bilowdo iyo waqtiyada uu ku egyahay adigoona soo ogaanayo meesha aad geeneyso oo aad kasoo qaadeyso canugaaga.
- Ku bilow inaad isticmaasho magaca macalinka, haddi aad awoodo.

## Sida dugsiga barbaarinta ubadka uu u caawin doono canugaaga

Dugsiga barbaarinta ubadka ayaa sidoo kale ka caawiya carruurta inay u diyaargaroobaan bilaabidda dugsiga. Marka ay joogaan dugsiga barbaarinta ubadka, carruurta waxay ku kobciyaan xirfadaha iyagoo umaraya ciyaarta, la shaqeynta carruurta kale iyo saxiibo yeelashada.

Macalinka dugsiga barbaarinta ee canugaaga ayaa ka caawin doona canugaaga inuu kasoo gudbo dugsiga barbaarinta ubadka oo uu ugudbo dugsiga caadiga ah isagoo qoraya **Bayaanka Gudbitaanka Barashada iyo Horumarinta (Bayaanka Gudbitaanka)**. Bayaanka Gudbitaanka ayaa la siyaa dugsiga mustaqbalka ee canugaaga. Wuxuu qeexayaa kartida, awoodaha, iyo danaha ubadkaaga iyo sida ugu wanaagsan ee ay wax kubartaan. Waxaa lagaa codsan inaad ka caawiso buuxinta Bayaanka Gudbitaanka ee canugaaga, ubadkaagana waxay kaloo la wadaagi karaan afkaartooda iyo dareenkooda.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan Bayaanka Gudbitaanka, fadlan booqo webseedka Waaxyaha (hoos ka eeg).

## Waxbadan ka ogoow

- Talooyinka ku saabsan bilaabitaanka dugsiga (education.vic.gov.au)
- Kasoo gudbidda dugsiga barbaarinta ubadka una gudbidda dugsiga caadiga ah (education.vic.gov.au)
- Sida loo doorto dugsiga oona la isaga diiwaangeliyo (education.vic.gov.au)
- Bilaabista dugsiga: diyaarinta canugaaga | Shabakada Barbaarinta Ubadkaaga
- Bilawga Caafimaadka Qaba ee Lagu Bilaabayo Dugsiga - Wadiiqada Caafimaadka ah ee Wanaagsan
- Ugudbitaanka ilaha kheyraadka ee dugsiga ee loogu talagalay qoysaska (education.vic.gov.au)